

Sidan 1/Bogga 1:

IN LA DEGANAADO GURI KIRO AH

Macluumaad iyo talooyin ku socda qofka degan guri kiro ah

Sidan 2/Bogga 2

Buugan yar waxa aanu ku soo ururiney macluumaad muhiim ah iyo talooyin loogu talo galay qofka degan guri kiro ah.

Halkan waxa lagu qeexayaa waxa adiga masuuliyadaada ah iyo waxa masuuliyad kireeyaha guriga ah, sida ugu wanaagsan ee aad ugu daryeeleyso gurigaaga iyo waxyaalaha kale ee wanaagsan in laga fikiro marka dad badan wada degan yihiin.

Sidan 3/Bogga 3

Waxyaalaha muhiimka ah ee u baahan in laga fikiro

- Waa kireeyaha guriga inuu gurigu yahay mid xaalad fiican oo waxkastaa shaqeynayaan.
- Waa adiga masuuliyadaada inaad daryeesho gurigaaga oo aad bil kasta wakhti ku bixiyo kirada.

KIRADA WAKHTI KU BIXI

Waxa muhiim ah in kirada wakhti lagu bixiyo. Waxaad bixineysaa bisha soo socota ugu danbeyn maalinta shaqo ee bisha ugu danbeysa.

Haddii aanad kirada ku bixin wakhti ayaa lumin kartaa heshiiskaaga guriga. Waa inaad sidaas darteed sid ugu dhakhsaha badan ula xidhiidho kireeyaha guriga, haddii aanad sabab darteed u bixin karin.

TALOOYIN! Qaar badan ayaa u arka inay dhibyartey in lagu bixiyo autogiro ama e-faktuura. La hadal mid ka mid ah shirkada guryaha haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arintan.

KANTAROOOL FURAYAASHAADA

Marka aad u soo guurto ayaad heli doontaa tiro furayaal ah. Marka laga reebo furaha guriga ayaad inta badan heli doontaa fure gaar ah oo lagu furo alaabka dibada, qolka qasaalada iyo khanka. Kantarool inaad heshay furayaasha saxda ah iyo inay tiradu dhan tahay. Adiga ayaa shakhsi ahaan ka masuul ah inaad hubiso furayaasha. Ka fikir in furayaashaadu ay yihiin wax qiimo leh.

TIIJAABI ALAARMKAAGA DABKA

Alaarmka dabka ayaa naftaada iyo ta dadka kale badbaadin kara haddii uu dab bilowdo. Kireeyaha guriga ayaa hubinaaya inuu gurigaaga ku yaala alaarmka dabku laakiin waa inaad adigu naftaadu tijaabisaa inuu shaqeynaayo. Si joogto ah u tijaabi adigoo riixaaya badhanka tijaabada. Waxa muhiim gaar ah leh haddii aad safar ku maqneyn iyadoo ay baytariyadu dhamaan karaan. La soo xidhiidh shirkada guryaha haddii aanay alaarmka dabku shaqeynayn.

SAMEYSO CAMISKA GURIGA

Waxa muhiim ah inaad leedahey caymiska guriga. Waxa ay dhaqaale ahaan ku difaaci kartaa haddii ay

wax ku dhacaan gurigaaga ama alaabtaada. Haddii uu tusaale ahaan dab dhaco ayaa adigoo soo maraaya caymiska guriga heli doontaa magdhow waxyaalaha ku dhaawacmay dabka.

Caymiska guriga ayaa sidoo kale noqon kara badbaado haddii adigu tusaale ahaan aad sababto dhaawac khatar ah, sida tusaale ahaan dab.

Caymisyada badankooda waxa ku jira xatooyada.

TALOOYIN! Qor liisto waxyaalaha muhiimka ah ee aad leedahay oo xataa ka qaad sawir. Waxa ay kuu dhib yareyn kartaa haddii aad u baahato inaad magdhow dalbato.

Sidan 4/Bogga 4

Gurigaaga daryeel

Adiga ayaa ka masuul ah inaad daryeesho gurigaaga Sidaas darteed ayaa ugu baahan tahay inaad joogto:

- Ugu nadiifiso filterka madbakha
- Ka saar timaha iyo qashin sbulaacada musqusha.
- Barfka ka saar talaagada iyo qeybta barafka.
- Masax shoolada iyo talaagada ka dib.
- Kantarool oo nadiifi meelaha hawadu guriga ka soo gasho.

WAXA MUHIIM AH IN QALADKA TOOS LOO SOO SHEEGO.

La xidhiidh kireeyaha gurigaaga sida ugu dhakhsah badan ee suurtoogalka ah tusaale ahan haddii aad aragto in biyo dareerayaan ama haddii aad cayayaan ku aragto. Cayayaanka qaarkood ayaa adiga kharashka lagaa qaadi haddii aanad isla markaaba soo sheegin.

Waxa jir lambar adeega degdega oo aad wici karto habeenkii ama xiliyada dhamaadka todobaadka haddii aad wax qalad ah oo keenaaya dhibaato degdega. Soo ogow waxa khuseeya gurigaaga.

TALOOYIN! Ku keydso lambarda telefoonada muhiimka ah moobaylkaaga ama sameyso liisto meel wanaagsan oo guriga si aad ugala soo baxdo marka aad u baahan tahay.

MAXAAN SAMEEYAA HADDII AY BULAACADU XIDHANTO?

Haddii ay bulaacadi xidhanto ayaad marka hore isku deyi doontaa inaad ka qaado waxa biyaha xanibaaya. Haddii aanay taasi suurtoogal aheyn ayaad la xidhiidhi doontaa shirkada guryaha oo sida ugu suurtoogalsan aad sameyn doontaa qalad soo sheegis. Marna ha isticmaalin kiimiso tusaale ayaan lut, si aad ugu nadiifiso bulaacada.

Adiga ayaa ka masuul ah inaad kolba muddo ka dib aad ka qaado timaha iyo qashinka kale ee yaala filterna hoose ee sinxiga lagu qubeysto iyo ka faraxalka.

MIYAAN GURIGA WAX KA BADELI KARAA?

Haddii aad adigu nadiifineyso guriga waa in marka hore taas uu kireeyahu ansaxiyaa. Haddii aad dooneso inaad rinji mariso ama warqad saarto waa in taas loo sameeyo si xirfadeysan oo aanu isbedelku ahaan mid xad dhaaf ah. Weydii kireeyaha guriga haddii aanad hubin. Alaabta galaysa ayaad adigu iska iska bixineysaa.

Waxa laguu ogolaan inaad meelah aqaarkood god ka dalooliso gidaarka oo iyo saqafka si aad wax ugu dhajiso. Laakiin ka kantarool garee marka hore kireeyaha guriga maxaa yeelay waxa lagaa dalbado inaad kharashka bixiso haddii aad si qalad ah u sameyso ama haddii aad godad badan ka dalooliso. Qolka musqusha waa in aanad wax god ah ka daloolin iyadoo aanad haysan ogolaanshaha kireeyaha guriga.

MIYAAN ANIDGU BADELI KARAA LAANBADAHA IYO WAXYAALAKA KALE EE KORONTAD GURIGEYGA?

Qeyb ka mid ah ayaad adigu bedeli kartaa, laakiin waxay u baahan tahay inaad leedahay aqoonta la iskaga baahan yahay.

Waxa aad:

- bedeli kartaa guluubyada iyo laanabadaha
- bedeli kartaa balaagyada iyo fiyuusyada
- ku xidh oo kaga saar guluubyada meel qalalan.

Haddii meesha nalka laga shido, fiishta ama waxyaalaha ku dhagan ay u baahan yihiin in la bedelo ama la hagaajiyo waa inaad la soo xidhiidho shirkada guryaha. Had iyo jeer qabso qof ogolaansho u haysta rakiban korontada.

TALOOYINKA XAAQIDA

Guryaha Iswiidhan waxa lo dhisay si ay xiliga jaboobaha ugu noqdaan kuleyl iyagoo sidaas darteed u nugul qoyaanka.

Marka aad masaxeyso guriga waa in aanad isticmaalin biyo badan. Marna haku shubin biyo dhulka! Hubi in dhulka iyo meelaha kale ay yihiin qaley.

Gurigu waxa uu leeyahay meelo ay hawadu ka soo baxdo si loogu nadiifyo hawada qoyan. Waxa sidaas dareed muhiin ah in ay furan yihiin meelaha hawadu ka baxdo.

Sidan 5/Bogga 5

La xidhiidh kireeyaha gurigaaga sida ugu dhakhsah badan ee suurtoalka ah haddii aragto in biyo dareerayaan!

Sidan 6/Bogga 6

Dhamaan kireystayasha guryaha ayaa wadajir u leh masuuliyad meelaha la wadaago.

Sidan 7/Bogga 7

Tixgalin sii

In tixgalin la siiyo xiliyada 2.00 iyo 07.00 ayaa muhiim ah.

Si aanad u qashqashin jaarkaaga, ka fikri in:

- La iska maqlo jaranjarta. Ororodka, ciyaarta iyo albaabka oo xoog loo xidho ayaa si dhibyar wax u qashqashi kara.
- Kireste ahaan waxaad masuul ka tahay inaan xataa martidaadu qashqashin jaarka.
- Dhin codka TV-ga, kambiyuuterka iyo rikoodhka.
- Iska ilaali inaad dalooliso ama wax ku tunto xiliga danbe ee habeenkii.

- In xaflad la sameysto ayaa ah mid wanaagsan, laakiin fadlan wakhti wanaagsan ogeysii jaarkaaga.
- 1. Waxaad xaq u leedahay inaad gurigaaga si degan ugu raaxeysato. Haddii lagu qasqaso waa inaad marka hore toos ula xidhiidho jaarkaaga ku qasqasaaya.
- 2. Haddii aan jaarku markaa joojin inay ku qashqashaan - la soo xidhiidh shirkada guryaha.
- 3. Haddii ay qashqashaadu weyn tahay oo ay dhacayso habeenkii ama xiliyada dhamaadka todobaadka ayaad soo wici kartaa khadka qashqashaada ee shirkada guryaha ama toos booliiska. U sheeg magacaag, cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka, waxa dhacaaya iyo cida ku qashqasheysa.

Kireyste si joogto ah u qashqashaaya jaarkiisa ayaa khatar ugu jira in guriga laga saaro/ceydhiyo.

WAAD KU MAHADSAN TAHAY INTA AANAD GAADHIGA CARRUURTA DHIGIN JARANJARTA!

Jaranjartu waa dariiq laga baxo iyadoo la baneynaayo si gargaarka degdega ay u soo gali karaan haddii loo baahdo.

Gaadhiga carruurta, kabaha iyo baaskiilka ayaanay aheyn inaad marna dhigto jaranjarta ama ilinka.

Ha dhigin sidoo kale qashinka, alaabta guryaha ama waxyaalaha kale. Taasi waxa ay khuseysaa xataa irida khanka guriga hoostiisa iyo khanka banaankiisa.

Marka laga reebo inay qashin ku reebto ayay adkeynaysaa in la soo galo iyo khatarta in uu dab ka bilowdo.

TALOOYIN! Waxa laga yaabaa inuu gurigaaga jiro qol la dhigo gaadhiga carruurta. Weydii kireeyahaaga.

XEERARKA QOLKA QASAALADA

Qasaalada waxa aad la wadaageysaa jaarkaaga. Marka aad isticmaalayso qasaalada ayaad wakhtigaaga horey u sii qabsanaysaa. Ixtiraam wakhtiyada la qabsadey.

Nadiifi kadib marka aad dhameysato dhaqistaada.

MIYAAN XAWAYAAN KU HAYSAN KARAA GURIGA?

Haa, haddii aanay heshiiska kireysiga ku oolin wax kale ayaa la ogol yahay. Laakiin ka fikir tan:

- Xawayaanka ha sii deyn adigoo aadn arkeyn.
- Markasta ku hay eyda xadhiga meelaha guryaha dhexdeeda.
- Hubi in eyda iyo bisadaha aanay wasakheyneyn meesha, gaar ahaan agagaarka meelaha ay carruurta ku ciyaarayaan.

SI SAX AH U KALA SAAR QASHINKAAGA

Soo ogow mesha aad ku tuureysa qashinkaaga. Joornaalka iyo baakeedada ayaa si gooni ah loo kala saarayaa. Waxyaalaha wax lagu rito ee ka sameysan dhalo, bir, balastig iyo warqad ayaa lagu rideyaa baaldi gooni ah. Marmarka qaar ayaa xataa hadhaaga cuntada la kala saarayaa.

Qashinka khatarta sida baytariyada, kiimikada iyo aaladaha korontada ayay muhiim dheeraad ah tahay in aan ku darin qashinka kale ee aad ku rido baaldi gaar ah.

Qashinka waaweyn, sida tusaale ahaan alaabta guryaha ee jajaban, ayaa marmarka qaar la geyn karaa goobo loo qoondeeyey kuwaas.

Qeydii kireeyahaga waxa ka shaqeynaaya gurigaaga.

Sidan 8/Bogga 8

Su'aalo & jawaabo

Maxaa ku jira kirada?

Kirada waxa inta badan ku jira wax kasta marka laga reebo korontada. Haddii aanay wax kale ku oolin heshiiska guriga ayaad kiradaada ka bixineysaa kuleylinta, biyaha, qashin qaadista iyo masaxaada jarjarta.

Miyaan gurigeysa ku bedelan karaa guri kale?

Haa, haddii aad leedahay kontaraaga gacanta koowaad oo uu kireeyaha gurigaagu kuu ogolaado taas. Marmarka qaar ayaa gudiga kireystayaashu ogolaan karaan bedelaada xataa haddii uu koreeyahaagu maya ku yidhaa.

Maxaan u baahaney inaan ka fikiro ka hor inta aanan guriga ka tagin?

Guriga waa in si taxadir leh loo nadiifiyo/masaxo ka hor inta aanad dhiibin furayasha. Kireeyaha guriga ayaa qeybiya liistad la eegaayo marka la guuraayo taas oo aad raaci karto. Haddii uu gurigu aanu si ku filnen loo masaxin ayaa kadib lagaa qaadi kharashka lagu masaxaayo.

Kahor inta aanad guurin ayaa kireeyaha gurigu sameyn doonaa kormeer guriga. Wixii dhaawacyo ah ama waxa xoog u duugoobey ee guriga ayaa lagaa qaadi karaa kharashkooda.

Intee in leeg ayaan deganaan karaa guriga?

Heshiiska guriga ayaa yeelan xili go'an ama ilaa muddo aan cayimneyn sii shaqeyn kara. Shuruuda ugu weyn ayaa qofka leh heshiiska koowaad siineysa amaanka muddada.

Taas micnaheedu waxa weeye inaad adigu aad xaq u leedahay inaad sii deganaato guriga ilaa inta aad rabto haddii aan kireyahu haynin sabab weyn oo uu heshiiska ku jabinaayo.

Miyaan gurigeysa cid kale ka sii kireyn karaa?

Haa, haddii uu kireeyaha gurigu ogolaado taas. Sababta in dib gacan labaad loogu kireeyo ayaa tusaale ahaan noqon karta inaad wax ka baraneyso ama ka shaqeynayso magaalo kale ama isku dayeyso inaad qof kale la noolaato. Haddii aad gurigaaga kireyso adigoo aan ogolaansho ka haysan shirkada gurigaaga ayaa lagaa saari karaa guriga. Ka fikri in qofka haysta heshiiska gacanta koowaad uu ka masuul yahay in kirada la bixiyo iyo in aan la qashqashin jaarka xataa haddii u qof kale gurigaaga degan yahay.

Sidee ayaan u sameynayaa bedelaada cinwaanka markaan guuraayo?

Marka aad guureysa waa inaad cinwaankaaga cusub u sheegto Skatteverket– waa bilaash taasi. Miyaad doonaysaa in bostadu xili cayim toos laguugu soo wareejiyo cinwaankaaga cusub (dib lagaaga soo daba diro) ayaanay waxba ku kharash gareyneyn. Waxa aad guuritaanka iyo in waraaqaha lagaa soo daba diro ka sameyn kartaa bogga internetka ee Svensk adressändring; www.adressandring.se.

Insticksblad till SABOs broschyr Att bo i hyresrätt

Språk: Somaliska

Sidee ayaan u dhiibayaa gurigeeyga haddii aan rabo inaan guuro?

Waa inaad markasta heshiiskaaga kireysiga u dhiibto qoraal ahaan. Kadib marka aad dhiibto heshiiskaaga gurigaaga waa inaad sii bixiso lacagta guriga muddo xili go'an ah. Xiliaas waxa loo yaqaan xiliga iska dhiibista. Xiliga iska dhiibistaadu waxa uu ku qoran yahay heshiiska guriga. Haddii aad tusaale ahaan aad dhiibto guriga taariikhda 24 abriil ayaa heshiisku dhamaanayaa 31 luulyo waana inaad kirada bixiso ilaa xiligaas.

Fadlan la xidhiidh shirkadaada guryaha haddii ay jirto wax aad isweydiinayso.